1. ***Waa maxay Pandemic EBT (P-EBT)?***

Sharciga fadaraalku wuxuu u baneeyay Gobolada inay hirgeliyaan barnaamij ku meelgaar ah oo loo yaqaan Pandemic- Electronic Benefit Transfer (P-EBT), kaasi oo siiya carruurta mutaysatay dheefaha Supplemental Nutrition Assistance Program (SNAP, hore loogu yaqiin tigidhada cuntada). Ardayda dugsiga xannaanada ka horeeya (Pre-K) ilaa fasalka 12aad ee dhigta dhismayaasha dugsiyada mutaystay cuntooyinka bilaashka ah ama qiime dhimista leh ee loo marayo National School Lunch Program (NSLP) ama School Breakfast Program (SBP) waxay mutaysan karaan dheefaha P-EBT.

Barnaamijka waxa maamula Waaxda Ohio ee Adeegyada Shaqada iyo Qoyska, waxayna Waaxdu wada shaqayn la leedahay Waaxda Waxbarashada ee Ohio (ODE) si ay u xaqiijiyaan in carruurta mutaysatay ay helaan dheefahan muhiimka ah.

2. ***Sidee ayaan ku oggaan karaa haddii ilmahaygu uu mutaystay dheefaha P-EBT?***

Sida sharciga cusub ee la ansixiyey Oktoobar 1, 2020 dhigayo, ilmaha dugsiga dhigtaa wuxuu mutaystay P-EBT haddii laba shardi la buuxiyo:

- Ilmuhu wuxuu heli lahaa cuntooyinka bilaashka ah ama qiime dhimista lagu sameeyay ee hoos yimaada NSLP ama SBP haddii uusan jirin xaaladda gurmadka caafimaadka ee COVID;***iyo***
- Ilmuhu aanu ku helin cuntooyinka bilaashka ah ama qiime dhimista lagu sameeyay dugsiga sababtuna tahay dugsiga oo xiran (oo ay ku jiraan waxbarashada maqal iyo muuqaalka/onlaynka ah) ama uu ku shaqeynayay wakhtiga ama saacadaha imaanshaha oo la dhimay (waxa ku jira jadwalada isku dhafka ah) muddo ah ugu yaraan 5 maalmood oo xiriir ah.

Markii shuruudahan la buuxiyo, ilmuhu wuxuu mutaystay dheefaha P-EBT maalmaha aanu si fool-ka-fool ah u imanayn dugsiga, ama uu dugsiga si fool-ka-fool ah u tago laakiin aanuu helin cuntada dugsiga si uu dugsiga ugu cuno. Carruurtu may mutaystaan dheefaha P-EBT maalmaha ay dugsiga si fool-ka-fool ah u tagaan ee ay cuntada dugsiga ku cunaan. Tusaalayaal carruurta dugsiga ee ay suurtogal tahay inay mutaysteen waa xaaladaha soo socda:

- Carruurta oo dhami waxay wax ku bartaan si gebi ahaanba onlayn ah;
- Carruurtu waxay ku jiraan waxbarashada isku dhafan;
- Carruurta haysta ikhtiyaarka inay si buuxda onlayn wax ugu bartaan (tusaale, Virtual academies), in kastoo dugsigu uu si buuxda ugu shaqaynayo si fool-ka-fool ah; ama
- Carruurta sida caadiga ah dugsiga si fool-ka-fool ah u taga laakiin karantiil loogu sameeyey COVID-19 dartii muddo ugu yaraan 5 maalmood oo xiriir ah.

Sharcigii hore sida uu dhigayo, dugsiga ku hawlgalaya jadwalka isku dhafan muddo ugu yaraan 5 maalmood ah iyadoo waxbaridda fool-ka-foolka ah ay u qabsoonto maalin dhaaf (Isniinta, Arbacada, Jimcaha) halka waxbarashada maqal iyo muuqaalka/onlaynka ah ay tahay maalmaha kale (Salaasada iyo Khamiista) may mutaysan P-EBT. Sida sharciga cusub dhigayo, dugsiga leh noocan jadwalka ah ee isku dhafan ah wuxuu buuxiyay shuruudaha P-EBT. Iyadoo laga duulayo taariikhda dugsigu uu buuxiyey shuruudaha sare, carruurta mutaysatay ee aan hore ugu mutaysan qaabka isku dhafan waxa la siin karaa dheefaha Ogosto iyo Sebteembar.

3. ***Qaddar intee leeg ayuu heli doonaa ilmaha mutaystay?***

Ilme kasta wuxuu heli doonaa **$6.82** (isku darka qaddarka magdhawga fadaraalka ee maalinlaha ah ee quraacda iyo qadada ee sanad dugsiyeedka 2020-2021) maalin kasta oo ilmuhu aanu helin cuntooyinka bilaashka ah ama qiime dhimista leh ee dugsiga iyadoo ay ugu wacan tahay xirnaanshaha dugsiga (waxa kamid ah waxbarashada maqal iyo muuqaalka/onlaynka ah) ama ku shaqaynayey imaanshaha ama saacadaha oo la dhimay muddo ah ugu yaraan 5 maalmood oo xiriir ah. Tan waxa kamid ah maalmaha ilmuhu aanu ku sugnayn dugsiga si fool-ka-fool ah sababtoo ah wuu bukay ama waxa loo karantiilay.

3. ***Sidee dheefaha P-EBT bixiyaa?***

ODJFS waxay ka heshay liis ah dugsiyada ama degmo dugsiyeedyada kaasi oo ah dhammaan carruurta mutaystay cuntooyinka bilaashka ah ama qiime dhimista lagu sameeyay iyo tirada maalmaha ay buuxiyaan shuruudaha P-EBT. Iyadoo laga duulayo xogtan, faa'idooyinka P-EBT waxa lagu bixiyaa kaarka electronic benefit transfer (EBT).

Haddii ilmuhu hadda qaato SNAP:

- Dheefaha P-EBT waxaa lagu shubi karaa xisaabta ilmuhu leeyahay horraanta Febraayo.
- Haddii aan ardayga la waafajin karin koontadiisa shaqaynaysa ee SNAP, waxaa laguu soo diri doonaa kaarka P-EBT oo magaca ilmahaagu ku yaalo.

Haddii cunugu uusan hadda qaadan SNAP:

- Marka la gaaro bartamaha Febraayo, waxaad heli doontaa kaarka P-EBT oo gunnooyinka cuntada lagu shubay kaas oo laguu soo dhigaayo boostada.
- Kaarku waxaa ku qornaan doona magaca ilmaha, laguma qoraayo magaca waalidka ama masuulka.
- Tilmaamo ku saabsan sida looga shaqeysiiyo kaarka ayaa lasoo raacin doonaa (sidoo kale fiiri tilmaamaha hoose).
- ***Waxa waajib ah inaad haysato kaarkan maadaama aad u isticmaali doonto dheefaha P-EBT ee mustaqalka ee ilmahaagu mutaystay.***

Haddii ilmuhu markii hore ku jiray SNAP, laakiin aanu hadda ku jirin, wuxuu heli doonaa kaarka P-EBT. Ilme kastaa wuxuu heli doonaa kaarka P-EBT; dheefaha carruurta walaalaha ah hal kaar la iskugu gayn maayo.

In kastoo aad heli doonto kaar cusub bartamaha Febraayo, haddii aad ku heshay kaarka P-EBT dheefo hore, wali waa shaqayn doonaa waana la isticmaali karaa haddii ay wax harsan yihiin.

4. Immisa jeer ayaa dheefaha loo bixiyaa?

Haddii ilmahaagu buuxiyey shuruudaha mutaysiga P-EBT ee bil, dheefaha waxa loo siin sida soo socota:

Dheefaha Oktoobar iyo Noofambar (dheefaha Ogoosto iyo Sebteembar ee carruurta hadda ku mutaysatay sharciga cusub) waa in la bixiyo horraanta Febraayo. Kaararka P-EBT ah oo cusub waa inay qoysasku helaan bartamaha Febraayo.

- Dheefaha Diisambar waxa la bixin doonaa dhammaadka Febraayo.
- Dheefaha Janaayo waxa la bixin doonaa dhammaadka Maarso.
- Dheefaha Febraayo waxa la bixin doonaa dhammaadka Abriil.

- Dheefaha Maarso waxa la bixin doonaa dhammaadka Maajo.
- Dheefaha Abriil waxa la bixin doonaa dhammaadka Juunyo.
- Dheefaha Maajo waxa la bixin doonaa dhammaadka Luulyo.
- Dheefaha Juunyo waxa la bixin doonaa dhammaadka Ogoosto.

5. Miyey qoysasku dalban karaan dheefaha P-EBT?

Maya. P-EBT ma laha dalab. Ilme kasta oo mutaystay cuntooyinka bilaashka ah ama qiime dhimista lagu sameeyay waa inuu helaa dheefaha P-EBT. Haddii ilmahaaga aan loo oggolaanin cuntooyinka bilaashka ah ama qiime dhimista lagu sameeyay, waa inaad la xiriirto dugsiga ilmahaaga si aad u waydiiso sida loo dalbado.

6. ***Miyey tahay qoysku inuu aqbalo oo uu isticmaalo kaarka?***Maya, ka qeybqaadashadaada barnaamijku waa mutadawacnimo. Haddii aad doorato inaadan ka qeybqaadan, fadlan iska tuur kaarkaaga adigoo ka jaraya qeybta birlabta leh ee ku taala kaarka oo u tuur qaab ammaan ah. Cid kale kuma wareejin kartid kaarka.

7. Muddo intee le'eg ayuu qoys uu heli karaa dheefaha P-EBT ee kaarka?

Dheefaha P-EBT waxay diyaar ahaan doonaan muddo 12 bilood ah. Haddii 12 bilood kadib dheefaha P-EBT la isticmaali waayo, xisaabta waa laga saari doonaa. Qoysaska SNAP ee wakhtigan waxay weli heli doonaan dheefaha SNAP ee u harsan.

8. Sidee kaarka P-EBT looga shaqeysiin karaa?

Qoysku waa inay qaadaan tallaabooyinka soo socda si ay uga shaqeysiiyaan kaarka:

1. Wac lambarka taleefanka ee ku yaala dhabarka kaarka P-EBT.
2. Aqoonso lambarka kaarka P-EBT ee ku yaala xagga hore ee kaarka si aad u galiso,
3. Isticmaala taariikhda dhalashada ilmaha ee magaciisu ku yaalo kaarka.
4. Markii lagaa dalbado inaad galiso afarta god ee u dambeeya ee lambarka sooshiyaal sikiyuuriti, **gali sannadka dhalashada ilmaha (tusaale, 1980)**oo
5. Sameyso lambar aqoonsi oo cusub oo afar god ka kooban kaasi oo la isticmaali doono mar kasta oo kaarka la isticmaalayo.

9. **Miyuu Pandemic EBT baddiil u yahay "grab-and-go" iyo/ama cuntooyinka xagaaga ee ay dugsiyadu bixiyaan?**

Maya, dugsiyadu waxay sii wadi karaan hawlgalinta barnaamijyadan waxaana dhici karta carruurtu inay helaan dheefaha Pandemic EBT siina wataan helitaanka cuntooyinka "grab-and-go".

10. ***Miyey carruurta guriga wax loogu dhigo ama taga dugsiga ee aan ka qeybqaadan National School Lunch Program mutaysteen P-EBT?***

Maya, kaliya carruurta heli lahaa cuntooyinka bilaashka iyo kuwa qiime dhimista lagu sameeyay ee loo maro NSLP ama SBP ee dugsiga haddii aan loogu talogalin xaaladda gurmadka caafimaadka ee COVID ayaa mutaystay.

11. ***Miyay carruurta soo-galootigu heli karaan P-EBT?***

Haa. sida National School Lunch Program, P-EBT waxa heli karaa dhammaan carruurta dugsiga iyagoon loo eegin xaaladda soo-galootinimo. P-EBT waa badiilka cuntooyinka dugsiga ee bilaashka ah iyo kuwa qiime dhimista lagu sameeyay kuwaasi oon la tixgalin go'aaminta "kaalmo ku tiirsanida".

12. ***Waa maxay cinwaanka kaarka P-EBT lagu hagaajinayo haddii waalidiinta ilmuhu ay is fureen ama ayna isku guri degganayn?***

Kaararka P-EBT waxa loo diri doonaa cinwaanka dugsigu hayo. Tani sidoo kale waxay khusaysaa carruurta wakhtigan hesha SNAP laakiin aan la waafajin karin kiiska shaqaynaya.

13. ***Carruurta la korinayo ee hela cuntooyinka bilaashka ah iyo kuwa qiime dhimista leh, kee ayaa kaarka EBT loo diri - ma waalidka korinaya mise hay'adda adeegyada carruurta dawladda?***

Kaarka waxa lagu hagaajin doonaa cinwaanka dugsiga kaaga diiwaangashan.

14. ***Haddii qoys uu si kama' ah kaarka P-EBT u tuuro ama uga hallaabo, maxay sameynayaan?***

Qoysku waa inay wacaan Conduent (soosaaraha kaarka P-EBT) 1-866-386-3071 si ay u codsadaan kaar kale haddii kaarku ka lumay, laga xaday ama waxyeelo soo gaartay. Waa isku mid hannaanka macaamiisha SNAP ay maraan si ay u badiil ugu helaan kaarka Ohio Direction EBT. Qoysku waa inay bixiyaan macluumaadka soo socda si ay u codsadaan kaar kale:

Markii qoysku wacaan, kaarkoodii hore waa la iska xirayaa, waxaana boostada loogu soo diri karaa cusub. Haddii qoysku uu helo kaarkii ka lumay, awood u yeelan maayaan inay isticmaalaan markii ay soo tabiyaan inuu ka lumay ama laga xaday. Qoysku waa inay sugaan inta kaarka cusub ee boostada la soo dhigay uu soo gaaraayo, taasi oo qaadan kartaa 7-10 maalmood.

Qoysku waxay ku codsan karaan kaar kale nidaamka jawaabta duuban (IVR) iyagoo bixinaya lambarka kaarka ama macluumaadka qofka haddii aysan garanayn lambarka kaarka.

Si ay ula hadlaan Wakiilka Adeegga Macmiilka ah si ay u codsadaan badiilka kaarka P-EBT marka qoysku aysan xasuusan karin lambarka 16-ka god ah ee P-EBT:

Taabo Ikhtiyaarka 4 - Si aad u soo sheegto kaar lumay, la xaday ama waxyeeloobay

- Waxa lagaa codsan doonaa inaad galiso SSN-kaaga (wacaha P-EBT waxa ku WAAJIB ah inuu galiyo: 9 god. 0 + taariikhda dhalashada ilmaha)
- Waxa lagaa codsan doonaa inaad galiso taariikhda dhalashadadaa (wacaha P-EBT waxa ku WAAJIB ah inuu galiyo taariikhda dhalashada ilmaha: 2 god bisha\2 god maalinta\4 god sannadka)
- Marka lagaa codsado inaad galiso aqoonsigaaga (PIN), Waxba Ha Samayn
- Marka lagaa codsado inaad galiso PIN-kaaga mar 2^{aad}, Waxba Ha Samayn.
  Tani waxay oggolaan doontaa in wicitaanka la dallacsiiyo si aad ula hadasho Wakiilka Adeegga Macmiilka ah ee tooska ah.

Xasuusin: waxa jira farriimo duuban oo ku saabsan dheefaha COVID 19, oo ay WAAJIB tahay wacuhu inuu dhageysto, ilaa dhammaadka. Dhammaadka farriinta, wacaha waxa lagu dhahayaa "Fadlan joog inta wicitaankaaga loo gudbinayo Wakiilka Adeegga Macmiilka."

15. ***Yay qoysku la xiriirayaan haddii ay su'aalo ka qabaan P-EBT?***

Su'aalaha barnaamijka ee guud, su'aalaha la xiriira dheefaha ilmahaaga ama kaarka P-EBT, fadlan wac khadka adeegga macmiilka P-EBT 1-866-244-0071 Ikhtiyaarka 1.

Haddii aad su'aalo ka qabto in ilmahaagu mutaystay ama aanu mutaysan cuntooyinka bilaashka ah ama qiime dhimista lagu sameeyay, waa inaad la xiriirto dugsiga ilmahaaga.

16. Ka waran haddii cinwaanka khaldan ee ilmaha la siiyay ODJFS oo qoyskuna ay tahay inay sheegaan cinwaanka saxda ah?

Haddii cinwaanku khaldan yahay, qoysku waxay wici karaan khadka adeegga macmiilka P-EBT 1-866-244-0071 Ikhtiyaarka 1.

17. ***Sidee dheefaha loo isticmaali karaa?***

Dheefahan waxa loo isticmaali karaa in lagaga iibsado cunto meel kasta oo aqbasha kaararka Ohio Direction.

Dheefahan lama beddeli karo. Ha u isticmaalin dheefaha P-EBT inaad ku iibsato waxyaabo aan habboonayn, sida khamri ama buuri iyo sigaar. Ha ka ganacsan ama ha gadin dheefahan. In lagu ciqaabo ayaad mudan doontaa haddii aad si ula kac ah sidaas u sameysid. Ciqaabaha waxa kamid noqon kara in mutaysiga barnaamijka lagaa saaro, lacag lagugu ganaaxo, iyo/ama xabsi in lagu dhigo.